



## Fidrada fiicani waa Shan: Gudniinka, xiiritaanka Bisqanta, Timaha Kilkilada

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka maqlay isagoo dhahaya: "Fidrada fiicani waa Shan: Gudniinka, xiiritaanka Bisqanta, Timaha Kilkilada".

[Xadiis Saxyix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey Shan wax yaabood oo Diinta Islaamka iyo Sunihii Ambiyada ka mid ah: Tan koowaad: Gudniinka, waana jaritaanka la jaro haraga sare ee qariya Madaxa Buuryada Raga, iyo in la jaro Madax Kintirka Gabdhaha halka Buuryadu marayso korkeeda. Tan labaad: waa xiiritaanka Timaha Bisqanta. Tan seddexaad: gaabinta Timaha Shaarubaha, lamana ogola inay qariyaan Bishinta. Tan afraad: waa jaritaanka Cidiyaha. Tan Shanaad: waa Timaha Kilkillada oo la rifo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3144>

